

DAVID DRISKELL


ASTAAMAHA DABIICIGA IYO TAARIIKHDA
19KA JUUN ILA 12KA SEBTEEMBAR 2021



Ilaha waxbarashada iyo brograamka bandhigga *David Driskell: Icons of Nature and History (Astaamaha Dabeecada iyo Taariikhda)* waxaa suurto geliyay taageerada iyo aqoonta Indigo Arts Alliance. David C. Driskell wuxuu ahaa la-talliyaha duqa xuska Indigo Arts Alliance, tababaraha, iyo saaxiibka. Dhaxalka uu ka tagay Driskell waxaa sharaf u haaya Black Seed Studio Artist-In-Residence iyo David C. Driskell Fellowship. Aasaaska ujeedada Indigo Arts Alliance waxay tahay in la balaariyo lana xoojiyo fanaaniinta Madow iyo Maron ee kobciya bulshadana. Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan Black Seed Studio, fadlan booqo bogga internetka Indigo www.indigoartsalliance.me



PORTLAND MUSEUM of ART
(207) 775-6148 | PortlandMuseum.org



TILMAANTA SAWIRADA FANKA

"Waxaan ahay tollaha sida hooyo. Aniga waxaan ahay dhisaha, beeraley yar, iyo beeraley weyn sida aabe ahaa. Maadooyinkeeyga diiniga, waxaan ahay wacdiyaha sida aabe iyo awoowe ahayeen. Waxaan ahay gof badiya ah oo wax qabadleh."

ERAYADA MUHIIMKA

Archetype

shay ama qof ku soo noqnoqda sheekooyinka ka jira dunida

Candomblé

diin ku saleysan caqiidooyin laga soo qaaday gobolo kala duwan oo ku yaal Afrika, oo si gaar ah ugu can baxay Brazil

Samawi (Celestial)

shay ama qof la xariira cirka ama samada

Waxay ay ka koobantahay (Composition)

iskuduwidda waxyaabaha laga arki karo fanka

Istilaabka (Crucifix)

calaamadda istilaabka jirka. Calaamaddaan waxay mattashaa Ciise Masiix, kaasoo lagu dillay istilaabka sida ay sheegto diinta Masiixiga

Mactab (Cross)

calaamadda diinta masiixiga

Ilaahiyaha (Diety)

ilaaha labka ama ilaaha dhedigga

Takoorka (Discrimination)

marka qof gaar ah ama koox loola dhaqmo si xaq darro ah taasoo ugu wacan noloshoodii hore ama aqoonsigooda

Ku daweyaha cagaarka (Herbalist)

qofka ku daweyo daawada ku saleysan cagaarka.

Astaan (Icon)

calaamad si ballaaran loo yaqaan lana xushmeeyo

Isirraaca (Rasism)

waa qof ama koox gaar ah loola dhaqmo si xaq darro ah taasoo ugu wacan isirka qofka.

Soocidda (Segregation)

kooxaha qaar oo laga saaro kooxaha kale, taasoo marmar ugu wacan isir raaca

Ruuxa (Soul)

gudaha qofka ama qeybaha aan jirka ahayn ee sifeeya dabeecadda qofka ee loo haysto in ay tahay ma dhinte

Ruuxi (Spirituality)

dareen qoto dheer iyo caqiidooyin la xiriira qofka iyo/ama diinta

Calaamad (Symbol)

shay ama wax nool oo qaata booska fikrad kale, qof, boos, ama shay. Tusaale ahaan, calanka wuxuu astaan u yahay waddan

Yoruba

jinsiyad ku nool galbeedka Afrika

*Xasuuso in astaanta iyo calaamadda leysku baddali karo gudaha tilmaantaan

COVER: David Driskell (United States 1931–2020), *Swing Low, Sweet Chariot*, 1972, acrylic on canvas, 50 x 36 inches
Tougaloo College Art Collections, Tougaloo, Mississippi. Purchased by Tougaloo College with support from the
National Endowment for the Arts, 1973.084. Photograph by Mark Geil. © Estate of David C. Driskell

David Driskell: *Icons of Nature and History* is organized by the High Museum of Art, Atlanta and the Portland Museum of Art, Maine.

MAJOR SUPPORT FOR THE EXHIBITION HAS BEEN PROVIDED BY



NATIONAL TOUR SPONSORSHIP PROVIDED BY



INDIVIDUAL SUPPORT
Isabelle and Scott Black
Danielle M. Conway and Emmanuel Quainoo

CORPORATE SUPPORT
McCandless & Coburn LLC
The Bear Bookshop, Marlboro, VT

FOUNDATION SUPPORT
Lunder Foundation—The Peter and Paula Lunder Family

This project is supported in part by the National Endowment for the Art.



Generous support from the Friends of the Collection.

The educational resources and exhibition programming for *David Driskell: Icons of Nature and History* were made possible through the support and expertise of Indigo Arts Alliance.

This exhibition is part of *Art for All*.

Art for All supports the PMA's dedication to being an open, accessible, inclusive, and welcoming museum for all, through exhibitions and programs that reflect our community and create experiences with art that strengthen our bonds and bring us together.

INDIVIDUAL SUPPORT:

Anonymous (2)
Judy and John Adelman
Justin and Rachael Alford
Louise Bessire
Mark and Aimée Bessire
Sheri and Joe Boulos
Beth L. De Tine
Patricia H. Dodd

Eileen Gillespie and Timothy Fahey
Shannon C. Gordon
Cyrus Hagge
Alison Hildreth
Douglas and Sharyn Howell
John and Hilary Isacke
Bree LaCasse and Chris Moore
Karen L. McDonald

Manny Morgan and Chris Corbett
Anne and Vince Oliviero
Alexander Porteous
Richard and Alice Spencer
Stewart and Elizabeth Strawbridge
Amy Woodhouse and Tobey Scott

FOUNDATION SUPPORT:



Elmina B. Sewall Foundation
Franklin P. and Arthur W. Perdue Foundation, Inc.

HORIZON
FOUNDATION, INC.

P.W. Sprague Memorial Foundation

CORPORATE SPONSORS:



MEDIA SUPPORT:



IN-KIND SUPPORT PROVIDED BY:

MUSEUM OF AFRICAN ARTS AND CULTURE wuxuu biyaa macluumaad badan oo xiiso leh iyo brograamy ku saabsan isdhexgalka dadweynaha oo fikrada gaar ah ka soo jeediya Fanka iyo Hiddaha Afrikaanka. museumofafricanculture.org

NEW ROOTS COOPERATIVE FARM waxay sugtaa dhaqaalaha loogu talagalay Mareykanka Cusub marka khudaar macaan loo soo saaro bulshadaha. newrootscooperativefarm.com

OUTDOOR AFRO waa bulsho oo Mareykanka-Afrikaanka kula xariiro dabiiciga oo isku xerta iyagoo adeegsada meelaha lagu nasto sida kamka, socodka, shimbiraha, mallaayga, beeraha yaryar, taraaraxa barafka - iyo in kale oo badan. outdoorafro.com

PORTLAND FREEDOM TRAIL waa safar lagu marro qaar ka mid ah xaafadaha ugu da'da weyn ugu taariikhda dheer ee Portland. Jidka wuxuu ku geyn doonaa goobaha muhiimka ah ee ku jira taariikhda Mareykanka-Afrikaanka, gaar ahaan kuwa jiray qarnigii 19aad ee lagu magacaabo Black Mainers ee horseedka u ahaa kana soo horjeeday adoonsiga. mainehistory.org/PDF/walkingtourmap.pdf

RACIAL EQUITY AND JUSTICE MAINE waxay taageero siisaa dhamaan bulshadaha qaranka, waxay adeegsataa la-tashi, waxbarasho, u doodid, iyo qorshooyinka falka ku saleysan xalka si loo qalabeeyo dadka, ururada, ganacsiga, iyo hay'adaha si wax looga qabto arrimaha caddaaladda isirka. racialequityandjustice.org

RISE AND SHINE YOUTH RETREATS waxay muhiimadda siisaa codadka iyo waxay ka jawaabtaa baahida caatifadda, hal abuurka iyo fiyoobida dhallinta madow, maroon, iyo kuwa dhalladka ah, waxay adeegsataa brograamyada dibadda iyo manaafacaadka laga helo daweynta dabiiciga. riseandshineyouthretreat.wordpress.com

SOMALI BANTU COMMUNITY ASSOCIATION wuxuu bixiyaa adeegyada ku meel gaarka ee lagama maarmaanka ah, u doodid, iyo soo saarka raashinka xoojiya xubnaha bulshada qaxootiga si loo taageero aqoonsiga iyo fiyoobida dhaqaalaha si horumar looga gaaro noloshooda cusub halkaan Maine. somalibantumaine.org

SOUL FIRE FARM waa bulshada ku bahowday dhalladka Afro-Indigenous oo xil iska saartay in ay xididdada u siibto isir raaca iyo madax banaani u aasta siistemka raashinka. soulfirefarm.org

THE THIRD PLACE waa meel leys kaashado oo laga wada shaqeeyo loona samayay in lagu dhiso awoodda bulshada, waxaa loo adeegsadaa shaqo wadajir iyo iskaashiga dhaqaalaha la siiyo ganacsatada, kuwa dhiso bulshada, iyo aqoonyaanka ka soo jeeda Afrikaanka. thethirdplace.me

“Aniga waxay ila tahay in fanaanka uu awood u leeyahay in uu naftiisa fidiyo marka uu ku hawlan yahay jiritaanka qaabka.”

Astaamaha la jecel yahay ee David Driskell waxay ka dhasheen naftiisa, bulshadiisa, iyo dhulka uu isaga dagganaa. Fankiisa waxaa ka buuxa astaamaha laga soo qaaday dunida dabiiciga, waxa uu kala kulmay Koofurta iyo Appalachia isagoo ah nin Madow, ku abtirsada Afrikaan, oo taga kaniisadda Masiixiga Madow.



DABIICIGA IYO JOMITRIYADA

“Ilaah baa ku mahad leh geedka uu na siyay.”

In badan oo ka mid ah rinjiyada Driskell waa xasuus la xariirto dabiiciga kaddibna wuxuu beertiisa yar ee ku taal Falmouth, Maine ku arkay meel uu ku ilaaliyo nafsiga. Wuxuu rinji mariyay xoolaha iyo dhirta sida geedaha loo yaqaan “pine”, geedaha “fern”, iyo massaska. **Maxaad u malleysaa marka aad aragtid calaamadahaan dabiiciga? Maxaad u malleysaa in sumadahaan dabeecadda mattsho?**

Driskell wuxuu bilaabay in uu rinji mariyo geedka caad ee haga bari ku yal, geedka gobolka Maine, markii uu tagay Dugsiga Skowhegan ee laga barto Rinjiga iyo Farshaxanka (School of Painting and Sculpture) ee ku yaal Bartamaha Maine sannadkii 1953. **Geedkaan maxuu calaamad u yahay?**

Astaanta goobada waa ku badan yahiin fanka Driskell, mowduuc ahaan iyo sida qaababka uu ka kooban yahay. Marmar waxay u muuqdaan sida meereystaha cirka (qoraxda iyo bisha). **Intee goobo ayaad ka tirin kartaa shaqadiisa? Maxay yahiin dareenka, ururada, ama xasuusta uu qaabka goobada kugu dhalliyo adiga?**

Diilamaha iyo xariiqmanka waa sasaan la arki karo oo ku soo noqnoqdo fanka Driskell. Waxay mattalaan waxyaabaha kora. **Maxay yahiin noocyada dhirta aad ku aragtid fankiisa?**

“Aniga waxay ila tahay in ay jiraan waxyaabo u gaar ah waayaha Madowga Koofurta... Mid ka mid ah halyeygeyga waayaha Koofur waa fanaan Madow, Romare Bearden.”

Qoyska Driskell waxay ahayeen beeraley. Rinjiga waxaa ka muuqda beeraha yaryar ee lagu abuurto khudaarta iyo raashinka laga tabcado Koofurta sida cagaarka loo yaqaan “collards”, bataatada macaan, khudaarta loo yaqaan “okra”, iyo digirta loo yaqaan “pole.” Rinjiyadiisa geedaha “walnut” iyo “pecan” waxaa laga samayay khaddka ku saleysan dhirta uu isaga abuuray.

ATLANTIC BLACK BOX waxay cilmi baaris ku samaysaa iyo waxay xasuusataa kaalinta New England ka qaadato dhaqaalaha guud adoonsiga. atlanticblackbox.com

BLACK OWNED MAINE waxay tahay in ay taageerto iyo in ay dadka ku baraarujiso ururada badan ee ka kooban Madowga iyo Maroonka Maine, sida ganacsiga, fanaaniinta, kuwa aan faa’iidada raadinin, iyo tujaarta. blackownedmaine.com

CO-LAB CREATE waa meel loogu talagalay fanka iyo hal abuurka, waxaa hoggaamiya madowga, dhalladka iyo dadka midabeysan ee taageera iyo horumariya fanka dadka midabeysan, dhalladka, iyo lesbiga, gay, labolabo, transgender iyo queer ama su’aalaha la weydiiyo (LGBTQ+) ku sugan gobolken. colabcreate.space

CODED BY YOUNG WOMEN OF COLOR (CYWOC) wuxuu horumariyaa hawlaha muddada gaaban iyo horumarinta shaqada sida tababarada qofka lagu siiyo mushaar iyo fursada shaqada ee lala galo shirkadaha horumarinta deegaanka, laga bilaabo Portland, ME. cywoc.org

FOR US, BY US FUND waxay deeq siisaa mashaariicda ay hoggaamiyaan dadka madow, dadka dhalladka iyo dadka midabeysan; iyo deeqda qofka ee la siiyo dadka baahida u qaba taageerada maaliyadda ama iskaashiga ka dhexeeyo. fubufund.org

HINGE COLLABORATIVE waa dadaalka fanka bulshada iyo xafiiska daabacaadda ee laga helo meel lagu shaqeeyo iyo lagu hormariyo looguna talagalay fanaaniinta. hingecollaborative.com

IN HER PRESENCE waxaa abuuray waxaana loo abuuray dumarka ka soo jeeda bulshada laga tirada badan yahay ee Maine iyo waxay martigelisaa fasalada luqadda ingirisiga iyo tababarada waxbarashada si miis loo siiyo dumarka muhaajirka Maine si ay ugu biiraan iyo si ay ugu guuleystaan halkaan Maine. inherpresence.org

INDIGO ARTS ALLIANCE waxay dhistaa xariir guud iyadoo is keenta fanaaniinta Madow iyo Maroon ee ka kala yimin nolol kala duwan si ay uga qeybgalaan hal abuurkooda iyo fursad ay u adeegaan sida tababareyaal iyo la-tababare. indigoartsalliance.me

LIBERATION FARMS waxay beeraleyda cusub Mareyanka siiyaan, ilo hiddo ahaan ku habboon, siyaabo ay ku soo saaraan raashin ku filan naftooda, qoysaskooda, iyo bulshadooda. somalibantumaine.org/liberation-farms


MAINE IMMIGRANT RIGHTS COALITION waa shabakad ku baahsan 77 urur, kuwaasoo intooda badan ay horseedaan dadka midabeysan - ee mattala bulsho dhallasho kala duwan oo ka jira gobolken kana shaqeeya in ay abuuraan iyo taageeraan brograamyada iyo siyaasadaha horumariya ka qeybgelinta iyo ku daridda. maineimmigrantrights.org



ILAHA MACLUMAADKA LAGA HELO

David Driskell waxaa loo xilsaaray balaarinta fanka madow iyo tababaridda fanaaniinta, dadka taariikhda yaqaan, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada. Wuxuu kaloo ahaa nin aad wax u beerta oo jecel dibadaha.

Halkaan waxaad ku arki doontaa ururada ay hoggaamiyaan Madowga Maine iyo New England ee taagersan waxyaabaha uu daneeyo iyo uu u doodo Driskell.



AMERICANA

Driskell wuxuu xasuusan yahay awoodda callanka Mareykanka “u leeyahay in uu dhiirigeliyo isu keenidda qilaafka.”

Qeybaha uu ka kooban yahay callanka Mareykanka waxaa in badan laga arki karaa fanka Driskell. **Xaggee ayaad ku aragtaa qeybaha ku jira callanka Mareykanka? Maxay yahiin ururada kugu soo dhaca? Ma jirtaa in qaar ka mid ah is qilaafsan yahiin, ama midba mika kale ka soo horjeedo?**

Kuraasta waa shay aad maalin kasta ku aragtid qaar ka mid ah rinjiga Driskell. Kuraasta dhabarka toosan waxaa badanaa lagu arkaa gudaha baadiyaha Koofurta, waxaana loo adeegsadaa sida taajka si loo xoojiyo awoodda diiniga ee dumarka. Driskell wuxuu kaloo soo aruuriyay Shaker alaabta guriga bacdamaa xafiiskiisa ku dhawaa xaafadda Sabbathday Lake Shaker Village.

Fiiri waxayaabaha kale ee ku jira farshaxanka. **Maxay yahiin waxyaabaha aad taqaanid? Maxaad ugu malleysay in Driskell dooran lahaa in uu iyaga rinji marriyo?**



DIINTA

Malaaiik iyo baalal ayaa in badan ka muuqda fanka Driskell. Aabahiis wuxuu ahaa wacdiye Baptist kaasoo badanaa ka hadli jiray malaaiikta iyo xuska. Driskell wuxuu tixgeliyaa kaniisadda Kaniisada Baabtiisaha Madow isagoo isticmaala astaamaha Masiixiga; mansabyada tixraaca heeshaha nafsiga; iyo isu keenidda tixraaca arkitetuurada iyo handasada.

Inta aad mareysid bandhigga, xaggee ayaad ku aragtaa qalqaalinta fanka Driskell?

Driskell wuxuu ku koray Koofurta marka sharci ahaan dadka la kala soocay. Rinjiga uu ka samayay istilaabka wuxuu tixraaca nolosha Emmett Till, wiil Madow oo jira 14-sanno kaasoo ay si xun u dileen caddaanka sannadkii 1955. Dilka Till wuxuu qaranka ku sii jeediyay dagaalka isirka iyo xaq darrada.

Fanka kale, sidee ayaad u aragtaa Driskell oo la xarbiya, ama ka fakara, kala soocidda ama dagaalka?

AFRIKA IYO AFRIKAANKA DIBADDA U HAAJIRAY


“Aniga waxaan xiiso u qabaa nooleynta qaar ka mid ah astaamaha xoogga badan ee macnaha weyn iigu fadhiya sida qofka ka soo jeeda abtisiinada Afrikaanka.”

Astaamaha ku jira fanka Driskell waxay u muuqdaan sida isu keenidda xubnaha uu ka kooban yahay, maadaada mowduuca, sasaanka, iyo xulashada maadada. Tollidda iyo handasada dharka Afrikaanka waxay in badan raad ku reebeen isu keenidda sawiradiisa kala duwan iyo rinjiga uu marriyay. Waxaa dhiirigeliyay maryaha leysku tolo, farsamo ay adeegsan jirtay hooyadiis, Mary Lou Cloud Driskell. Tolliinka maryaha Afrikaanka, waxaa jirta in maryo qafiif ah leysku tolo kaddibna laga sameeyo dhar. Maryaha waaweyn ee lagu sameeyo Galbeedka Afrika waxaa laga sameyaa maryaha gacanta lagu tolo sida dharka kente ee laga keeno Ghana.

Fankee ayaad ku aragtaa qalqaalinta tolliinka iyo/ama handasada dharka-Afrikaanka? Maxay yahiin qaar ka mid ah isla mid ahaashada u dhexeyso fankaan iyo tolliinka?

Dhiirigelinta uu ka dhaxlay safaradii uu ku tagay Benin, Ghana, iyo Nigeria, Driskell wuxuu isu keenay astaamaha sida maaskarada ku jirto fankiisa. Wijiyaada u shabaha maaskaro waxay muujiyaan awoodda iyo joogitaanka sii socda ee awooweyaashi hore. **Maxaad ku sifeyn kartaa maaskarada aad ku aragtid qaar ka mid ah fanka Driskell? Diinta Yoruba, madaxa waxaa loo fahmaa sida astaanta “ori inu,” gudaha ama nafsiga. Maxaad ku sifen lahayd ruuxa ku jira maaskarada aad aragtid?**

Driskell wuxuu in badan booqday magaalada Salvador ee Bahia, Brazil, isaga oo la socda aqoonyaana iyo fanaaniin. Hiddaha Candomblé ayaa inta badan ka dambeyay astaamaha Afrikaanka dibadda ee laga helo fanka uu meel isugu geeyay. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah sida uu Ohsun (ubaxa) ugu sawiray jaalo iyo casaan; Yemanja (hiirarka) midab baluug oo qoto dheer. **Fankee ayaad ku aragtaa isticmaalka midabadaan?**



6.

SAWIRADA

Noocyada qaar ee ku jira bandhigaan waxaa ka mid ah malaaipta nabad gelyada, beeraleyda, iyo dadka dhirta u isticmaalo daawo ahaan. Driskell wuxuu kaloo adiga kuu sawiray ilaaha Yoruba Shango, ee kantaroola biriqda iyo gugaca. Astaamaha caadiga Shango ama astaamaha la aqoonsan karo waxaa ka mid ah masaarta labada dhinac ka afeysan iyo ulasha qaloocan ee loo adeegsado dheesha (osha shango), ee mattala hilaaca.

Noocyada aad ku aragtid bandhigaan, ma ku xasuusiyaan sheekooyinka laga soo qaado hiddaha ama taariikhda qoyskaada?

Waxaa jira dhowr ka mid ah sawirada qofka oo ku jira bandhigaan; maxay yahiin astaamaha aad ku aragtid sawiradiisa-qofka? Maxaad u malleysaa in sheekooyinka ka sheegaan Driskell? Maxay yahiin sumadaha aad isticmaali kartid si aad u sheegtid sheekadaada?

Driskell wuxuu sawiray taxane dumar madow oo xaflad ku jira. Isaga wuxuu kaloo rinji marriyaa ilaahyada Yoruba Orisha iyo wadaadada waayeelka dhedigga. Ogwo sida uu u muujiyo wijiigooda, faruurah, iyo indhaha.

Maxay yahiin sifooyinka uu Driskell ku arko dumarkaan? Maxay yahiin sumadaha kale aad ku aragtid sawiradaan?

7.